

Waa maxay sababaha loo baaraayo maqalka ubadkayga?

Wax-maqalka ubadkaada waxeey bareysa hadalka. Kunkii caruur ah oo dhasho seddex ayuu maqalkooda xunyahay si joogta ah. Waxayna u badan tahay in ubadkaada ka xun yahay maqalka. Haddii jirto maqal xumi waxaa muhiim ah ogaasho goor hore.

Labada sano ugu horeyso ee nolosha ubadkaada waa mid aad u muhiim ah barashada hadalka iyo luqada. Waxaana haboon goor hore in la ogaado dhibaata maqalka maxaa yeelay waxaa laga hortagi karaa barasho la'aanta hadalka iyo luqada.

Cunuga ku dhasho isbitaalka inta oo ka bixin ka hor waxaa lagu sameyaa baarista maqalka. Ujeedada baarista waxay tahay in la ogaado awooda maqalka iyo in oo u baahan yahay imtixaanka maqalka. Waxaynu baaraynaa in ay jirto maqalka xumi sahlan iyo maqal xumi adag.

Sidee u shaqaysaa baarista ?

Waxaa jira labo nooc baaris ah. Ubadkaada waxaa lagu sameyn karaa hal ama labadaba Labada baaritaan waa mid nabadgalyo leh oo dhibaato u laheen ubadkaada.



- Baaritaanka koowaad oo yaqaan Evoked Otoacoustic Emissions (EOAE). Dhagta kore ubadkaada lagu xirayaa koomo qafiif ah si oo u sameyo cod dhawaaq ah. Dhagta caafimaadka qabto waxay u soo celinaysaa "jabaq-celis" xariga.
- Nooca labaad baarista waxaa loo yaqaano Brainstem Auditory Evoked Response (BAER). Dareem celin gaar ah ayaa lagu xirayaa jirka ubadkaada asago hurdaayo. Waxa dhagtana laga galinaya komo qafiif leh makarofan si oo u soo gudbiyo codadka is-dabajooga ah. Dareem celiyaha wuxuu cabirayaa dareenka maqalka ubadkaada bixiyo. Waxaa Jawaabta lagu doobaa laguna keediyaa kombiyuutarka.



Maxaa sameyaa ubadkayga haddii loo diro baaris kale?

Caruurta qaarkood waxay u baahan yihiin baaris labaad. Haddii ubadkaada u baahdo baaris labaad (ma'aha mid caadi ah), micnaheeduna ma'aha wuxuu qabaa maqal xumi. Sababo badan oo caadi ah ugu baahan yahay baarista oo ka mid ah: 1) Dhacaanka dhagta dhexe oo jiradda 2) Kanaalka dhagta oo xiro dhukay 3) Maqalka oo joogto loo lumiyo (1000 ilmo-dhasho 3).

Waxaa muhiim ah ubadkaada sida ugu dhaqsiiyaha leh maqalka labaad looga baaro. Caruurta way ku guuleystaan baarida labaad. Kuwa u baahan baarida waxaa loo dirayaa Dhakhtarka Maqalka ogaansho qiimeynta maqalka.

Waxaa dhaco baarista maqalka haddii ubadka ku guulaysto?

Haddii ubadkaada baarista maqalka ku guulaysto waxaa helaysaa kal-sooni in ubadkaada maqalkiisa caadi yahay waqtigaas. Hase ahaatee, maqalka ma'aha mid joogto ah waqti kastaba. Waxaa loo malayaa waqti dambe maqalka ka xumaad caruurta dhagaha cudur ugu dhaco, jiro joogta leh, ama qoosaska leh fir taariikh maqal xumi.

Haddii qabto wax ku quseeyo ku saabsan maqalka ubadkaada, u sheek dhakhtarka ubadkaada si dhaqsi leh. Dhakhtarku wuxuu ku siinaya daawo ku cawinto iyo inoo kuu diro baaritaan.

Waxaa loo baahan yahay inaad fiiriso maqalka ubadkaada ...

Dhalashada ilaa seddex bilood ...

- Ka nixin si dhaqsi codka weyn
- Hordo kicin, ooyin cod sare leh
- Dajin ama qaboojin codkaada
- Sameyn cod dabacsan

Seddex ilaa lix bilood ...

- Bilaawid in-dha raac ama madax u jeedin codka ama dhawaqa
- Joojinta goorta aad la hadasho
- Ku kicitaanka dhawaqa fudud
- Bilaawga inoo sameyo codka “ah” iyo “ou”

Lix ilaa sagaal bilood ...

- Fiirinta xubnaha qooska goorta la magacaabo
- U jaleecinda madaxa halka codka
- Ka jawaabida magaciisa
- Ka jawaabida fal muujinta sahlan
- Bilaawga ku dhawaaqida sida “aabo” iyo “hooyo”
- Isticmaalka codka si ku soo jeediyo

Sagaal ilaa labo iyo toban bilood ...

- Fahminta “maye”, “nabad-galyo”
- Ka jawaabida codka qafiifka
- Fiirinta sawirka goorta magacaabid
- Ku celiska erayada codka aad sameeyso
- Isticmaalka cod-bixinta goorta oo kaligii ciyaaraayo

Akhbaaro fara badan oo ku saabsan baarista maqalka ubadka dhashayla soo xariir dhakhtarka ubadkaada.

Ama la soo xariir:

Your hospital's newborn hearing screening program or Audiology department's contact information here

*Mashruucaan waxaa maalgaliyey
Children's Hospital & Regional Medical Center
& The Northwest Lions Foundation for Sight & Hearing.*




© Children's Hospital and Regional Medical Center 1999
All Rights Reserved

**Your hospital name, logo, address
& website here**

**WAXBARASHADA BUKAANKA SOCODKA
IYO QOOSKA**

UNHS contact phone number here

Baaritaanka Maqalka Ilmaha-dhasho



**Ubadka yaraan maka
laha baarista maqalka...**

**Your hospital name &
logo here**

